



# Kindaha Queensland

## Waa maxay kinduhu?

Kindergarten-ka, ayaa loo yaqaan kindy, waa barnaamij waxbarasho oo waqti dhiman ah ee sanada ka horraysa bareebka (sanada ugu horraysa dugsiga ee Queensland). Kindy waa meesha ilmahaagu wax ku barto kulana falgalo taas oo caawinta waxbarashada sanadhooda hore, samaqabka iyo horumarka.

Iyaga oo ka qaybgelaya kindaha, carruurta waxay yeeshaan jacaylka waxbarashada waxaana laga taageeraa u gudbidooda bareebka.

Xukuumada Queensland waxay ansixisay barnaamijyo kindy ah waxaana bixiya macalinka ilmanimada hore oo aqoon leh. Barnaamijyada Kindy waxaa lagu bixin karaa xarumaha waxbarashada ilmanimada hore, iyo meela kale kale oo doortay oo durugsan oo dugsiyada gobolada halkaas oo ay jiraan caqabado in laga hello kindergarten; iyo fogaansho ahaan iyo ekindy carruuraha qaarkood oo aan iman karin xarunta.

## Ku barashada Kindy

Kindy wuxuu siiyaa carruurta fursadaha lagu:

- isticmaalo luqad lagu gudbiyo fikrado, dareen iyo baahiyaha
- lagu samaysto saaxiibo, lagula falgalo kuwa kale
- lagu fahmo xaallado laguna sameeyo xirfadaha xalinta mashaakilada
- ay noqdaan kuwa aad isugu kalsoon una madaxbanaan awoodahooda
- kuna xiran, sahaminta door ka qaadashada aduunkooda
- dhisa aqoontooda oo sahamiya fikrada cusub si ay u dhisaan kalsoonidooda.

Ma maqashay?

Free **KiNDY** from 2024

Free  
**KiNDY**



Queensland  
Government

# Sida la isugu qoro

Queensland gudaheeda, carruurta waa tegi kaaraan kindaha sanada ka horraysa inta aanay bilaabin bareebka.

Adeeg walbaa waa ka duwan yahay kan kale qaarkoodna waxaa laga yaabaa inay leeyihiin safka sugitaanka, sidaas darteeda waa fikrad fiiaca inaad la hadasho adeega aad dooratay iyo waqtiga ugu fiican oo la keenayo ilmahaaga.

Ilmahaagu waa inuu jiraa 4 sanadood ugu dambayn 30ka Juun sanada lagu qorayo inay ka qaybgalaan kindaha.

Ilmaha dhashay	Ilmuhu waa tegi karaa kindaha
1da Juulay 2019 ilaa 30 Juun 2020	2024
1da Juulay 2020 ilaa 30 Juun 2021	2025
1da Juulay 2021 ilaa 30ka Juun 2022	2026
1da Juulay 2022 ilaa 30ka Juun 2023	2027
1da Juulay 2023 ilaa 30ka Juun 2024	2028
1 da Juulay 2024 ilaa 30ka Juun 2025	2029

Waxaad u baahan tahay inaad ilmahaaga ku qorto:

- Ilmahaaga magaciisa iyo cinwaanka
- Faahfaahinta ilmahooda ahaan, daryeelle ama masuul
- faahfaahinta amar kasta oo maxkamadeeda ama amarada waalinimada ama qorshaha
- faahfaahinta kaalma kasta oo loo baahan yahay (sida iinta, cuntada iinta, xasaasiyada cuntada ama baahiya kale)
- caddaynta taariikhda dhalashada (sida shahaadada dhalashada)
- Xaallada caafimaadka iyo talaalka
- faahfaahinta dadka loo ogol yahay inay qaadaan ilmahaaga iyo cida loo sheegayo wixii degdeg ah.

Adeegaaga ayaa ka dhigi doona macluumaadkaan mid qarsoodi waxaad heli doontaa diiwaanka ilmahaaga oo dhamaystiran.

Weydii kindy bixiyaha wixii ku saabsan

**Free**  
**KINDY**  
from 2024

# Doorashada barnaamijka kindaha.

Dhaman carruurta ku nool Queensland waxay xaq u leeyihiin inay tagaan barnamijka kindaha la ansixiyey sanada ka horraysa bareebka.

Barnaamijka Kindaha la ansixiyey wuxuu buuxiyaa talooyinka xukuumada, waana in:

- Barnaamijka barashada ay bixiyaan macalimiin aqoon leh oo ilmanimada hore, si waafaqsan talooyinka xukuumada
- Caadatan asbuucii 15 saacadood, 40 asbuuc sanadii carruurta ku jirta sand ka hoorays' bareebka
- la shaqaynaya kindergarten-ka Queensland kindergarten-ka baranaya hanaanka barashada ama jadwalada kale ee Queensland iyo qiimaynta barnaamijka barashada ee la ansixiyey.

Is loo caawimo barnaamijka la ansixiyey ee Xukuumada Queensland, si ay raadiyaan 'kindy tick of approval', taas oo ah muuqaalka hoose.



# Kindy lacag la'aana laga bilaabo 2024

Xukuumada Queensland waxay uga dhigaysaa kindahah lacag la'aan dhamaan qoysaska reer Queensland.

Kinduhu wuxuu u noqonayaa lacag la'aan carruurta ay tahay inay galaan barnaamijka la ansixiyey oo lagu bixinayo lacag la'aan laga bilaabo 1da Janaayo 2024.

Kana waa 15 saacadood oo lacag la'aana asbuucii, 40 asbuuc sanadii, oo kinde lacag la'aana oo uu bixinayo macalin aqoonteeda leh.

Qoysasku waxay doorman Kaaraan kindy kindergarten marmarka ah ama kindergarten maalinta oo dhan ah.

Raadi kindy lacag la'aana oo agtaada ah, booqo:  
[www.qld.gov.au/FreeKindy](http://www.qld.gov.au/FreeKindy)